



Tallaallada COVID-19

Pfizer-BioNTech, Moderna, AstraZeneca/COVISHIELD & Janssen (Johnson & Johnson)

La cusbooneysiay Sibtember 30, 2021

Khataraha COVID-19

COVID-19 waa infekshan fayras oo inta badan ku dhaca sambabada. Dadka waayeelka ah iyo dadka qaba xaalad caafimaad waxay u badan tahay inay si dhab ah ugu bukoodaan COVID-19. Wuxuu dhaawici karaa sambabada, wadnaha ama maskaxda. Calaamadaha muddada-dheer waxaa ka mid noqon kara dareemid daal, neefsashada oo dhib ah, feejignaan xumo, iyo murqaha oo xanuuna.

COVID-19 wuxuu sii wadaa inuu isku beddelo noocyoo cusub. Noocyada qaarkood ayaa si fudud ku faafi kara oo dadka ayuu ka dhigaa kuwo jiran.

Sida Tallaallada u shaqeeyaan

Tallaallada COVID-19 waxay jidhkeenna u sheegaan inuu sameeyo unugyada difaaca jirka ee innaga difaacaya fayraska COVID-19. Saddex ka mid ah tallaallada laga oggolaaday Kanada waxay u baahan yihin laba qiyasood. Tallaalka Janssen (*Johnson & Johnson*) wuxuu u baahan yahay keliya hal qiyas. Tallaalladan kuma jiraan fayraska COVID-19 mana na siin karaan COVID-19.

Faa'iidooyinka Tallaalka

COVID-19 tallaallada laga oggolaaday Kanada waxaa loogu talogalay dadka da'doodu tahay 12 illaa 18 sano iyo wixii ka weyn, oo ay ku jiraan dadka uurka leh ama naas nuujinaya, waayeelka, iyo qof kasta oo xaalad caafimaad qaba. Tallaalladaasi waxay dadka ka difaacaan qaadista iyo faafitaanka COVID-19. Waxay sidoo kale ka difaacaan jirrooyinka halista ah ee ka yimaada COVID-19. Waxay qaadataa ugu yaraan laba toddobaad kadib qaadashada tallaalka in la difaaco. Tallaallada u baahan laba qaadasho, difaaca buuxa ayaa dhaca 1-2 toddobaad kadib qiyasta labaad.

Tallaallada oo dhami waa u badbaado dadka qaba xaaladaha caafimaad sida dhibaatooyinka wadnaha ama sambabada, sonkorowga ama dhiig karka. Waxay sidoo kale badbaado u yihin dadka qaba xaaladda difaaca weerara jirka, ama habdhiska difaaca dacifka ah ee jirada ama daaweynta darteed, laakiin tallaalku uma shaqayn karo sidoo kale dadka qaba xaaladahaas.

Waxaa jirta fursad yar oo Aad weli ku qaadi karto COVID-19 tallaalka kadib. Waxaa muhiim ah in la sii wado raacitaanka talaabooyinka caafimaadka bulshada ilaa dad badan laga tallaalayo. Waqtigaan la joogo, waxaa jira macluumaad yar oo ku saabsan inta ay tallaaladu na difaaci doonaan. Qiyaasta xoojinta ayaa loo baahan karaa mustaqbalka.

Waxyaabaha Tallaalku Ka Kooban yahay iyo Xasaasiyadda

Tallaallada waxay ka kooban yihin dufan (dux), cusbo, sonkor iyo bafar. Kuma jiraan ukun, gelatin (doofaarka), gluten, cinjir, dawooyinka ilaaliya, antibiyootikada, ama aluminium. Xasaasiyadda tallaallada COVID-19 waa dhif iyo naadir. Tallaallada waa kuwo ammaan ah, xitaa haddii aad leedahay xasaasiyad cunno, daroogo ama



xasaasiyadda deegaanka. La hadal daryelahaaga caafimaad marka hore haddii aad xasaasiyad ku leedahay polyetylen glycol, tromethamine ama polysorbate.

Fal-celinta xasaasiyadda daran (anafilasigis) waa dhif. Fal-celinta xasaasiyadda waa la daaweyn karaa oo badanaa waa ku meel gaar. Hel daryeeye caafimaad haddii aad dhib ku qabtid neefsashada, ama ay kugu soo baxaan finan ama barar wajiga iyo cunaha ah.

Waxyellooyinka iyo Khataraha

Qiyaas ahaan boqolkiiiba 20 dadka ayaa leh waxyellooyin. Badankood waa kuwo khafiif ah oo dhexdhexaad ah, waxayna socdaan hal illaa saddex maalmood. Waxyellooyinka badanaa waxay ka dhigan yihiin in tallaalku uu ka shaqaynayo inuu kiciyo nidaamkaaga difaaca.

Saameynaha caadiga ah waxaa ka mid ah:

- guduudasho, xanuun, cuncun ama barar ku yimaada goobta mudista
- qandho
- madax xanuun
- dareemid daal
- murqo xanuun
- kala-goysyo xanuun
- qarqaryo
- lallabbo iyo/ama matag

Myocarditis iyo pericarditis:

- Myocarditis iyo pericarditis waa nooc caabuq ee qaybaha kala duwan ee wadnaha.
- Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha "[Public Health Agency of Canada](#)" ayaa la-socota tiro yar oo warbixinno dad qaangaara iyo dhalinyaro tallaalka kadib. Inta badan arrimahan dhacay waa kuwo sahlan oo dawooyin iyo nasasho lagu daweyey.
- Raadi daryeel caafimaad haddii aad dareento xabbad xanuun, neef-qabatin, ama wadno garaac tallaalka kadib.
- Tallaalu weli waxa lagu talinayaan in faa'iiddadiisu ka badan tahay khatarihiisa.

Waxyellooyinka naadirka ah kadib tallaallada qaada fayraska (AstraZeneca, COVISHIELD, Janssen):

- Xinjirowga dhiigga ee dhifka ah waxay ku xirnaan karaan tallaalada uu qaado fayras. Raadi daryeel caafimaad haddii aad dareento xabbad xanuun, neef-qabatin, ama barar lugaha ah, calool xanuun cusub ama ka sii daraya; madax-xanuun ba'an ama ka sii Daraya, ama haydh-haydh aragga ah; ama Nabarro maqaarka ah ama calaamado ka muuqda (oo aan ahayn meeshii lagaa tallaalay), 4 ilaa 28 maalmood kadib tallaalka.

Haddii aad fal-celin daran ku yeelato tallaalka, ama fal-celintu aysan tegin 3 maalmood kadib, u sheeg daryeel bixiyahaaga caafimaad iyagaana u soo sheegi doona astaamaha caafimaadka dadweynaha. Caafimaadka

dadweynaha ayaa la socda waxyeellooyinka si loo hubiyo in tallaaladu ay sii ahaanayaan kuwo nabdoon.

Dibu-dhigidda Tallaalka

- Haddii aad qabtid qandho ama astaamo kasta oo COVID-19 ah, sug illaa inta aad ka bogsaneyso kahor inta aan lagu tallaalin.
- Haddii lagugula taliyay inaad iskarantiisho waayo waxaad isku aragtay calaamado ama waxaad xiriir dhow la leedahay qof qaba COVID-19, fadlan dib ugu dhig jadwalkaaga ballan dambe, marka muddada iskarantiilkaagu dhammaado.

La tasho Daryeel Bixiyaha Caafimaadka

La hadal daryeel bixiyaha caafimaadkaaga ama dhakhtarka xasaasiyadda kahor intaadan qaadan tallaalka haddii aad:

- Aad qaadato dawooyinka dacifinaya habka difaaca jirka - waxaad ubaahan kartaa inaad waqt u dhaxaysiiso tallaalkaaga iyo daawooyinkaaga
- ku yeelatay falcelin xasaasiyadeed afar saacadood gudahood kadib markaad heshay qiyaastaada koowaad ee tallaalka COVID-19.
- ku leedahay xasaasiyad daran mid kasta oo ka mid ah maaddooyinka tallaalka

Sii wad Badbaadinta Naftaada iyo Kuwa Kale

Ilaa iyo inta dad badan laga tallaalayo, sii wadida tallaabooyinka caafimaadka bulshada oo ay ka mid yihiin kala-fogeynta jirka, maaskarada, iyo joogitaanka guriga haddii aad jiran tahay ayaa kaa caawin doonta kahortagga COVID-19 iyo noocyada walaaca.

Wixii macluumaad dheeraad ah: Kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad ama booqo websaydkeena toronto.ca/COVID19.

Kheyraadka: Guddiga La-talinta Qaranka ee Tallaalka. [Talooyin ku saabsan isticmaalka Tallaallada COVID-19](#).